

# Xaqiiqda Cudurada Galmada (STD)

Nongonococcal Urethritis (NGU)-Som

## Nongonococcal Urethritis (NGU)

(waxa keena jeermisyo kala duwan oon ahayn kuwa keena jabtada)

### CALAAMADAHA LAGU GARTO

Calaamadaha NGU-da:

- Waxay bilawdaan 1-3 toddobadd ka dib marka cudurka la qaado
- Haweenka badankood iyo qaar ka mid ah ragga ma muujiyaan wax calaamado ah
- Malax khafiif ah oo midabkeedu yahay caddaan ama jaalle oo ka timaada xubinta taranka ragga
- Dareemid gubasho ama dheecaan ka yimaada xubinta taranka haweenka
- Dareemid gubasho ama xanuun marka la kaadinayo

### ISU GUDBINTA

NGU waxaa Fidiya:

- Galmada caadiga ah
- Galmada aan caadiga ahayn

### DHIBAATOYINKA KA YIMAADA CUDURKAN

Haddii Aan la Daaweyn NGU-yada Waxay:

- Keeni kartaa in lahan kacu noqdo mid halis ah
- Xubnaha taranka ayaa waxyeelloobi kara
- Keeni kartaa madhalaysnimo ku timaadda ragga iyo haweenkaba
- Ku fidi kartaa dadka kale ee aad la galmooto

NGU iyo Uurka:

- Hooyada cudurka qabtaa waxay jeermiska u gudbin kartaa ilmaha marka uu dhalanayo
- Ilmaha cudurkan qaada waxa infakshan uu kaga dhici karaa indhaha ama sambabada (pneumonia)

### KA HORTAGGA

Talooyin ku Saabsan Sida loo Yareeyo Fiditaanka NGU-da:

- Isticmaal bac galmo oo habboon markasta oo aad samaynayso galmo caadi ah ama aan caadi ahayn

- Yaree tirada dadka ay galmadu idinka dhaxayso
- U tag dhakhtarkaaga si aad baaritaan u samaysid haddii aad ka shakido inaad cudurka qaadday
- Ogeysii dadka ay galmadu idinka dhaxayso isla markiiba haddii aad qaaddo cudurka
- Waa inaad hubisaa in dadka ay galmadu idinka dhaxayso la baaro lana daaweeyo

### DAAWEYNTA

Daaweynta NGU-da:

- NGU-da waa la daaweyn karaa marka la qaato daawadeeda saxda ah ee dhakhtarku qoro
- Dadka ay galmadu ka dhaxayso waa in isku mar la daaweeyaa

OGOW: In daawada ka dib qofku dib cudurka u qaadi karo.

### WIXII WARAR DHEERAADA, LA XIRIIR:

Infectious Disease Epidemiology, Prevention and Control Division

STD and HIV Section

Minnesota Department of Health

P.O. Box 9441

Minneapolis, MN 55440-9441

(612) 676-5414; (612) 676-5653 TTY

Khadka Teleefonka ee Qorshaynta Qoyska iyo Cudurada Galmada (STD) ee Minnesota (Minnesota Family Planning and STD Hotline) 1-800-783-2287 Teleefonka caadiga ah /TTY

Khadka Taleefonada Hay'adda Qaranka CDC Qaybta Qaabilsan Cudurada STD iyo AIDS (CDC National STD and AIDS Hotlines) 1-800-227-8922; 1-800-243-7889 TTY